



WAR-SAXAAFADEED

Taageero Geedi-Socodka Dimoqraadiyaynta Puntland.

Tixraac: PDF/02122

May 24, 2023

Golaha Qurbajoogta Puntland – Puntland Diaspora Forum (PDF):

- Waxuu isagoo ku hadlaya magaca Qurba-joogta reer Puntland taageerayaa doorashada golayaasha deegaan ee berri ka dhici doonta dhamaan degmooyinka Puntland, dhiiri gelinaysaa geedi-socodka iyo dhamaysirka nidaamka doorasho iyo dowlad daadajin ee ka socda Puntland, kaas oo shacabka reer Puntland ay mudo dheer ku taamayeen.
- Waxaa goluhu ka digayaa inaan cidna xukun ku doonin qori caaradii, khalkhal gelin amniga, dhaawacin dowladnimada, caburinna rabitaanka shacabka, waxaana ku dhiiri gelinaynaa cidkasta oo han siyaasadeed leh inay u maro wadiiqooyinka sharci.
- Waxaa goluhu uga digayaa hogaanka sare ee dowladda Federaalka Soomaaliya inay ka waantoobaan fargelinta qaawan ee ay ku hayaan geedi-socodka dimoqraadiyaynta iyo nidaamka axsaabta badan ee Puntland ka socda.
- Waxaan uga mahadinaynaa Beesha Caalamka taageeridda ay u muujisay geedi-socodka dimoqraadiyaynta Puntland. Doorashooyinkaan waxay ka turjumayaan rabitaanka bulshada reer Puntland, waxayna tusaale ku dayasho mudan u noqon doona Soomaali inteeda kale.
- Waxaan beesha caalamka ka codsanaynaa inay il-gaar ah ku hayaan faragelinta siyaasadeed iyo adeegsiga dhaqaale ee ay dowladda Federaalku ku hayso doorashooyinka iminka ka socda Puntland iyo kuwa mustaqbalka dhow ka dhici doona dowladaha kale ee Xubnaha ka ah Federaalka.
- Waxaan shacabka reer Puntland iyo Soomaalida inteeda kale ku dhiiri gelinaynaa inay taageeraan nidaam kasta oo looga guuri karo qabiil, kaas oo awooda wax doorasho dib loogu celinayo shacabka Soomaaliyeed ee xaqa u leh.
- Waxaa goluhu mahad gaar ah u soo jeedinayaa Issimadda reer SSC-Khatumo iyo kuwa Reer Nugaaleed ee u istaagay welina ku howlan sidii ay u demin lahaayeen shaqaaqada Garoowe ka dhacday.
- Waxaa golaha Qurba-joogta Puntland (PDF) ay diyaar u tahay in doorka kaga aadan ay ka qaataan sidii doorashooyinka Puntland jawi nabeed ugu qabsoomi lahaayeen, wixii is-maandhaaf siyaasadeed ah ee jirana xal waafi ah oo waara loogu heli lahaa.

Guddiga Isgaarsiinta & Xiriirka Bulshada - info@puntlanddiasporaforum.org